



FAMILY SERVICES OTTAWA
SERVICES À LA FAMILLE OTTAWA



10 CALAAMADOOD OO Muujinaya Tacadi Dhaqaale

**LAMAANAHA JACAYLKA TACADIGIISU
WAXA UU KU YIMAADAA QAABAB
BADAN OO WAXAA KAMID AH
TACADIGA DHAQAALAHA.**

Waa maxay tacadiga dhaqaaluhu?

Tacadiga dhaqaalaha waxaa lagu sheegi karaa maamulida lagu helayo, isticmaalayo, oo lagu haynayo ilaha dhaqaalaha qof. Habdhaqankani waxa uu caadiyan keenaa ku tiirsanaan dhaqaale oo qofka wax ku tacadiyaya ah.

50%

Canada, qiyaastii ilaa 50% dumarka ku jira hoyada dawlada ayaa la kulmay tacadi dhaqaale



CALAAMADOOD OO MUUJINAYA TACADI DHAQAALE:

- Maamulida dhamaan dhaqaalahaaga iyo in lagu dareensiiyo in aanad gaadhi karin go'aamadaada dhaqaale
- Ka haynta lacagta iyo macluumaadka dhaqaale
- Keenista su'aalo dhaqaale oo keena muran
- Waxaa lagugu khasbaa inaad sheegto dhamaan waxa aad ku bixisay ama inaad tusto risiidhka iyada oo lamaanahaagu aanu sidaa samaynin
- Waxaa lagu siiyaa lacag yar oo aad wax ku iibsato
- Kaadhka daynta ayaa lagu furtay magacaaga adiga oo aan ogolaanin iyo/ama waxyeelo taariikhdaada damaysiga
- Laguuma ogola inaad shaqayso, ama waxaa lagugu khasbay inaad ka shaqayso shaqo mushahar yar
- Farogelin shaqadaada ah oo cida aad u shaqayso khatar gelinaysa
- Lamaanahaaga ayaa lacagta qoyska (sida, lacagta raashinka) iskii u isticmaala
- Lamaanahaaga ayaa kuugu hanjaba inuu kaa tagayo oo wax dhaqaale ah kuma siiyo.

**Xataa marka xidhiidhka
lamaane meesha ka baxo,
waxaa sii socon kara tacadiga.**
Tani waxay noqon kartaa qaba qarín dhaqaale si aan loo bixin biilka caruurta ama in aan la xarayn cashuurta si markaa gunooyinka sida Gunada Ilmaha ee Canada aan loo xisaabin



**Daraasad Maraykanka lagu
sameeyay, waxay muujisay 94
ilaa 99% dumarka
lamaanahoodu ku tacadiyo inay
la kulmeen tacadi dhaqaale**

*This program is funded by the Government of Canada and Women and Gender Equality Canada (WAGE) through the Canadian Women's Foundation.

